Maxay shumacyada walaac u yihiin

Sanadii 2004 dhexdiisi, shumucyada guryaha dalka Mareykanka ayaa la qiyaasay 17,200 dab dhismooyin qabadsiyeen 200 dhimasho rayad ah, 1540 rayad dhaawaca, iyo 200 milyan dollllar oo ha khasaaraha tooska ee hantida.

Marka si amman leh loo adeegsado, shumacyadu guryaheenna waxay ka buuxi karaan iyado udgoon abuuraya, jawi degan oo qaab soo dhaweyn leh. Waxay ku kordhinaysaa ciidaha iftiin waxayna qayb muhiim ah ka qaadanaysaa xusaska diimaha. Laakiin haddii shumucyada laga tago ama iyago gubanaya dadku seexdan waxa si fudud u bilaaban kara dab ba'an.

38: boqolkiiba dabka shumacayada guryaha wuxu ka bilowdaa qolka jiifka.
14: boqolkiiba dabka shumacayada guryaha waxay dhacacaan Diseembar, ku dhawaad laba jeer bishiiba celcelis boqolkiiba 8.
12: boqolkiiba dabka shumacayada guryaha waxa sabab u ah hurdo lala dhacay.
54: boqolkiiba dabka shumacayada guryaha waxay dhacaan markii shay sahal ku guban og laga tago ama meel u dhaw shumaca la dhigo.
4: boqolkiiba dabka guryaha waxaa billaaba dadka (sida badan caruurta) oo shumaca ku ciyaarta.
91: boqolkiiba noocyada dabka la soo sheegay.

www.ci.minneapolis.mn.us/fire

Xiriir la leh

www.fire.state.mn.us

Ammanka Shumaca



Marka aad baxaysid, dami!



Maxaan samayn karaa?

Si sahlan ayaad u hubin kartaa in shumacayada aad gurigaada u isticmaashid si ammaana. Haddii aad ka heshid shumacyada gurigaada, raac talooyinka ammaanka ee soo socda.

- Dul saar shumacayada alaabo xasillan, shay adag oo haya iyo celiya xabagta shumac tifqaya.
- Marna, ha ka tegin shumac baxaya oo aan lala joogin.
- Haddii ay korontadu tagto isticmaal karbuuno si aad iftiin u hesho, shumacyada maya.
- Dhig shumaca meel ka fog waxyaabaha uu dabku qabsan karo idil.
- Saar shumacyada alaabo sare, meel aanay caruutu gaari karin ama xayawaanka dad-la-noolka.
- Marna ha saarin daaqadaha shumacyo daaran; waxay shidi kartaa shabaqa ama daahyada.
- Ha u oggolaan caruurta ama dhallinta in ay qolalka jiifka shumacayo ku isticmaalaan.
- Weydii su'aalo waxa ku saabsan shumacyada iyo shumac-hayaha aad soo iibsato. Dukaamada waaweyn waxay raacaan heerar cusub oo loo sameeyo shumaca oo aan jabi karin, aan isku laabmayn ama haddii kale aan caadi ahaan u shaqaynayn.
- Si taxddar leh u dami shumaca, adigo isticmaalaya gacanka shumaca affuufayana ama shay jilicsan, neefsasho toos ah. Iska ilaali inaad firdhisid dareerah tifqaya.

Shumacyada niyadda lagu dhisaa, laakiin si fudud ayay ku keeni karaan masiifo.

Waa maxay sababta uu u kordhayo tirada dabka shumacyada? Hal sabab waxay tahay caannimada shumacyada oo circa isku shareeray. Dadka Mareykanka waxay ku kharajgareeyaan shumacyada 2 bilyan oo dollar sanadkasta. Shumacyada hadda waxa laga heli karaa toddobadiiba dadka guryaha deggan 10 dalka oo dhan.

U diyaargarow waxa ugu xun

Qoys kasta wuxu u baahanyahay qorshe dabka looga baxsanayo. Ku soco gurigaada dhexdiisa aqoonsana laba meelood oo laga baxo qol kasta. Ka bacdi sawiro qorshahaaga ka baxsiga dabka. Ku tijiaabi qorshahaaga baxsiga carbiska dabka ugu yaraan laba jeer sanadkiiba. Tijaabadu waxay xaqiijinaysa in qof weliba oo ka mid ah qoyskaada inu ogaado waxa uu samaynayo haddii dab kaco.

Markasta dooro ku baxsiga wadiiqada ugu ammaansan, tijaabina adigoo guur-guuranaya; waxa dhici karta in aad ku soo baxdid qaac si aad uga baxdid. Qaacu waa wax qurun ah — weliba dabka waa ka xunyahay qudhiisa. Si aadan u neefsan qaaca, hoostiisa ku gurguuro, gacmaha iyo jilbaha Madaxagu meel ammaana waa inuu ahaada.

Cidamadada waaxaheenna wadajira **NFP inta lagu jiro Toddobaadka Ka-hortagga Dabka, toddobaadkiisa 2aad ee October**, si loo soo saaro wacyigalinta sababaha ugu weyn ee dabka guryaha keena iyo tallaabooyinka aad qaadi kartid si looga hortago.

Ammaanka shumacyada waa mudnaanta ugu sarreysa ee ammaanka dabka, muddada Toddobaadka Ka-hortagga Dabka iyo sanadka oo dhan.

Haddii aad gurigaaada shumac ku isticmaalaysid, "si taxaddar leh u maamul."